

Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka baadhitaanada ilmaha dhawaan dhashay ee gobolkaaga, oo uu ku jiro xaaladaha gaarka ah ee laga baadho, fadlan kala xidhiidh:

Connecticut

State of Connecticut, Public Health Laboratory
10 Clinton Street, P.O. Box 1689
Hartford, CT 06144
(860) 509-8081
www.ct.gov/dph

Maine

Newborn Screening Program, Dept. of Health & Human Services
Key Bank Plaza - 7th Floor, 286 Water Street
Augusta, ME 04333
(207) 287-5357
www.maine.gov/dhhs/boh/cshn/bloodspot_screening/index.html

Massachusetts

New England Newborn Screening Program
University of Massachusetts Medical School
305 South Street
Jamaica Plain, MA 02130-3515
(617) 983-6300
www.umassmed.edu/nbs

New Hampshire

Maternal & Child Health Section
29 Hazen Drive
Concord, NH 03301-6504
(603) 271-4225
www.dhhs.state.nh.us/dhhs/mch.htm

Rhode Island

Rhode Island Department of Health
3 Capitol Hill, Room 302
Providence, RI 02908-5097
(800) 942-7434
www.health.ri.gov/genetics/newborn.php

Vermont

Vermont Department of Health, Children with Special Health Needs
108 Cherry Street, P.O. Box 70
Burlington, VT 05402
(802) 951-5180

**Baadhitaanada Ilmaha Dhawaan Dhashay:
Waxay Badbaadin Karaan Noloshaha Ilmahaaga**



Sponsored in part by a grant from the Genetic Services Branch of the Maternal and Child Health Bureau (MCHB) of the Health Resources and Services Administration (HRSA) and the New England Regional Genetics and Newborn Screening Collaborative, HRSA Grant #1U22MC03959

Waa maxay sababta uu ilmahaygu ugu baahan yahay baadhitaanada ilmaha dhawaan dhashay?

Marka la eego sharciga, waa in dhamaan ilmaha dhawaan dhashay laga baadho dhawr xaalado caafimaad oo dhif ah laakiin culus. Ilmaha qaba xaaladaha waxay u eekaan karaan kuwo caafimaadqaba wakhtiga dhalashada. Haddii aan la daweyn, xaaladahaasi waxay keeni karaan dhibaatooyin caafimaad sida daahis caqli, koritaan gaabiya, iyo xiitaa geeri. Marka la daweyyo, waxa laga yaabaa in laga hortago dhibaatooyinka.

Sidee baa loo baadhi doonaa ilmahayga?

Kalkaaliso ama xirfadle caafimaad oo kale ayaa dhawr dhibcood oo dhiig ah ka qaadi doona cidhibta ilmahaaga. Waxa qaybta dhiigga ah loo diraa shaybaadhka ama labaratooriga ilmaha dhawaan dhashay.

Goorma ayay tahay in qaybta dhiigga ah la qaado?

Waa in dhiigga la qaado ka dib marka uu ilmahaagu jiray 24 saacadood, taasoo laakiin ah ka hor inta aan ilmahaagu ka bixin cisbitaalka.

Sidee ayaan ku heli doonaa natiijooyinka baadhitaanka?

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa kula soo xidhiidhi doona haddii natiijooyinku sheegayaan in laga yaabo in ilmahaagu qabo mid ka mid ah xaaladaha. Dhakhtarka ayaa kaala hadli doonaa natiijooyinka iyo waxa u baahan in la sameeyo ee ku xiga.

Weydii natiijooyinka baadhitaanka marka aad aragtid dhakhtarka ilmahaaga.

Ka waran haddii ilmahaygu u baahan yahay in dib loo baadho?

Marmarka qaarkood, waxa uu ilmuhu u baahan yahay in markale la baadho. Qasab ma aha in taa machaneedu yahay in ilmahaagu qabo xaalad caafimaad. Waxa laga yaabaa in loo baadho in baadhitaanka lagu celiyo haddii:

- Qaybta dhiigga ah waxa la qaaday ka hor inta aan ilmahaagu jirin 24 saacadood
- Waxa jirtay dhibaato la xidhiidhay sida qaybta dhiigga ah loo qaaday
- Baadhitaankii ugu horeeyay ayaa muujiyay xaalad caafimaad oo suurogal ah


Dhakhtarka ilmahaaga ama barnaamijka baadhitaanka ilmaha dhawaan dhashay ayaa kula soo xidhiidhi doona haddii baadhitaan dheeraad ah loo baahan yahay. Waxa muhiim ah in baadhitaankaa isla markiiba la sameeyo.



Waa maxay baadhitaanada la sameeyo?

Baadhitaanada la sameeyo waxay ku xidhan yihiin gobolka aad ku nooshahay. Gobolka kastaa waxa uu baadhaa liis xaalado oo ka kale wax yar ka duwan. Guud ahaan, xaaladaha la baadho waxa loo kala qaybin karaan kooxaha soo socda:

- Xaaladaha hawlo nololeedka, kuwaasoo saameeya sida jidhka u isticmaalo cuntada
- Xaaladaha dheecaanada qanjidhada, oo saameeya heerarka hormoonada muhiimka ah (hormones)
- Xaaladaha Hiimogolobiinta, oo saameeya dhiigga sababana dhiig-yaraan, caabuqid, iyo dhibaatooyin caafimaad oo kale
- Xaalad sambab, oo saameysa korniinka iyo sambabada



Si aad u heshid liiska xaaladaha laga helo gobolkaaga, la xidhiidh barnaamijka baadhitaanka ilmaha dhawaan dhashay ama weydii dhakhtarkaaga.

Baadhitaan lagu sameeyo xaalad kale oo dheeraad ah waxa laga yaaba in laga heli karo shaybaadh ama labaratoori haddii la bixiyo lacag.

Sidee ayaa loo daweyyaa xaaladaha?

Daweyntu xaalad kasta waa u gaar. Waxa daweynta ku jiri kara cunto gaar ah, hormoono, iyo/ama dawooyin.

Haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah xaaladahan, waxa si weyn muhiim u ah in daweynta loo bilaabo sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Ka waran haddii aan qabo su'aalo kale?

Weydii dhakhtarka ilmahaaga ama la xidhiidh barnaamijka baadhitaanka ilmaha dhawaan dhashay ee gobolkaaga. Fadlan dhabarka qoraalkan yar ka eeg liiska barnaamijyada ilmaha dhawaan dhashay ee New England.